



MAXAA XOGTAYDA SHAQSI LOOGU GUDBIYAY EURODAC?

Nooca B

**MUWAADINIINTA DALALKA SADDEXAAD AMA QOFKA
AAN LAHAYN DAL NOLASHO OO SI SHARCI DARRO AH
U JOOGA DAL KA MID AH DALALKA XUBNAHA AH**



➤ **MAXAAN BUUG-YARAHAN U HELAYAA?**

Waxaa lagugu ogaaday inaad kasoo gudubtay xuduud dibada ka ah dal EU+ ah bilaa fasax.

Buug-yarahan wuxuu bixiyaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xogta ay hay'aduhu kaydin doonaan iyo muddo intee la'eg.

➤ **MAXAAN UGU QASBANAHAY INAAN BIXIYO FARAHAYGA IYO SAWIRKAYGA?**

Hay'adaha waddankan waxay qaadi doonaan farahaaga iyo sawirkaaga. Xogtan, oo ay la socoto macluumaadkaaga aqoonsiga iyo macluumaad kale oo muhiim ah, waxaa loo gudbin doonaa keyd wadaagga Yurub ee Eurodac.

Eurodac waxay isku xirtaa qaybaha qaarkood ee dadka aan ahayn muwaadiniinta dalka EU+ iyaga oo la xiriirinaya sadkooda faraha iyo sawirkooda gaarka ah.

Keydkan waxaa isticmaala dhammaan 31 waddan oo EU+ ah kuwaas oo ka baaraandegi kara xogtaada si ay u helaan macluumaadkaaga. Dalalka EU+ waxaa lagu taxay dhammaadka buug-yarahan.

Adigu waxaad imika joogtaa Latvia, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+.

Waddamada EU+ waa:



27-ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo



4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway, Switzerland.



MACLUUMAAD NOOC EE AH AYAA LAGU KAYDIYAA EURODAC?



Macluumaadka soo socda mar walba waa la kaydiyaa:

- farahaaga
 - sawirka wejigaaga
 - dhammaan magacyada aad hadda isticmaasho ama hore u isticmaali jirte
 - tarikhda dhalashadada
 - meesha aad ku dhalatay
- dhalashadada ama dhalashooyinkaaga
 - jinsigaaga
 - nuqulo ka mid ah dukumentiyada aqoonsiga ama safarka ee aad isticmaashay, haddii la heli karo, oo ay ku jirto macluumaadka ku saabsan saxnimadooda
 - aqoonsiga isticmaalaha shaqaalaha qaaday farahaaga iyo sawirkaaga iyo taariikhaha la qaaday oo la gudbiyay xogtaada
 - Goobta iyo taariikhda lagugu helay adigoo si sharci-darro ah uga gudbaya xuduudda.

Macluumaadka soo socda sidoo kale waxaa lagu kaydin karaa Eurodac haddii loo baahdo

- macluumaadka ku saabsan haddii aad aqbashay soo jeedin aad si iskaa ah ugu laabatid dalkaga
- macluumaad ku saabsan wakhti kasta oo aad ku noqotay dalkii aad ka timid, ha ahaato adiga oo go'aan ka gaaray ama haddii ay kaa saareen hay'adaha.
- haddii lagu doortay in lagu raro, dalka EU+ ee lagu raro.

Waxaad xaq u leedahay inaad gasho oo aad saxdo macluumaadka khaldan ee lagu kaydiyay Eurodac iyo inaad codsato in xogtaada la tirtiro haddii si sharci-darro ah loo maamulo. Waxaad la xiriiri kartaa kantaroolaha xogta si tan loo sameeyo.

Faahfaahinta kantaroolaha xogta waxaa laga heli karaa buugga yar ee

cinwaankiisu yahay **'Waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato Eurodac'**.

➤ MUDO INTEE LA'EG AYEY XOGTAYDA SHAKHSIGA AH KU KEEYDSANAAN DOONTA EURODAC?



Xogtaada waxaa lagu kayd in doonaa 5 sano ka dibna si otomaatig ah ayaa loo tirtiri doonaa.

Haddii aad qaadato jinsiyadda dal EU+ ka hor inta aan mudadaasi dhicin, xogtaada waa la tirtiri doonaa. Haddii xogtaada la tirtiro, tani saameyn kuma yeelan doonto xaaladdaada dalka aad jinsiyadda ka heshay.

➤ MACLUUMAD KALE MIYAA LAGU KEYDIYAA EURODAC?

Natiijada baaritaanka amnigaaga waa la kayd in doonaa haddii hay'aduhu ogaadaan in laga yaabo inaad:

- heysato hub
- noqoto mid rabshad sameeya
- ku lug yeelato dambiyo argagixiso
- dembi culus ka gashay dal EU+ kale oo lagugu xiri karo dalkaas.

Xaaladahan, waxaa loo tixgelinayaa inaad halis ku tahay amniga gudaha. Tan waxaa lagu kayd in doonaa Eurodac oo ay wehliyaan sababaha lagu cadeeyay ee kor ku xusan.

Haddii dalalka EU+ ay kuu aqoonsadaan inaad halis aheyn, macluumaadkan waa la tirtiri doonaa.

Waxaad xaq u leedahay inaad gasho oo aad saxdo macluumaadka khaldan ee lagu keydiyay Eurodac iyo inaad codsato in xogtaada la tirtiro haddii si sharci-darro ah loo maamulo. Waxaad la xiriiri kartaa kantaroolaha xogta si tan loo sameeyo. Faahfaahinta kantaroolaha xogta waxaa laga heli karaa buugga yar ee **'Waxa aad u baahan tahay inaad ka ogaato Eurodac'**.

Qoraalkan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Keligii ma abuuru xuquuq ama waajibaad EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas'uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira qoraalkan. © Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025